



Jamhuuriyada Somaliland

Golaha Wakiilada JSL



Warbixinta

Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 26^{aad}

(From 24 November 2014 to 13 January 2015)

March 2015

[Waaxda Hadal Qoraalka](#) | [Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 26^{aad}](#)

Tusmada Warbixinta

1. Ajendihii Kal-fadhiga 26 ^{aad}	3
2. Kal-fadhigii 26 ^{aad}	4
3. Xeerarka Goluhu ka doodey:-	4
3. Mashaariicda Sharci iyo Xisaab Xidhada Goluhu Ansixiyey	4
4. Ansixinta Odoroska Miisaaniyada 2015ka:-	5
5. Masuuliyiinta Goluhu Ansixiyay	6
6. Masuuliyiinta Qaran ee Golaha Warbixino siiyey.	7
2. Xeerarka Golaha iyo Gudiyadu Gacanta ku hayaan:-	8
8. Waxqabadka Guddi Hoosaadyada Golaha Wakiilada.	9
9. Aqoon korodhsiyo, Workshops iyo Kormeero:-	14
10. Wufuudii Golaha Timi:-	16
11. Safarda Dibada:-.....	19
12. Qiimeyntii Hay'adda ABRIMO ee Golaha:-	21

Ku:- Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL.

Ujeedo: - Warbixinta Shir-gudoonka ee kal-fadhigii 26^{aad}

Mudanayaal

Si aynu u gudano hawlaha inooqorshaysan **kal-fadhiga 27^{aad}** ee Golaha Wakiilada oo una dardar galino, una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhigii hore inagoo gudanyna Waajibaadkeena Qaran, waxaan halka idiinku soo gudbinayaa waxqabadkii Golaha Wakiilada ee kal-fadhigii 26^{aad} oo dhamaystiran si aad u xasuusataan wax yaabihii inoo qabsomay iyo wixii aan inoo qabsomin.

1. Ajendihii Kal-fadhiga 26^{aad}

23/11/2014

1. Ansixinta Guddida Doorashooyinka Qaranka
2. Warbixinta Shirgudoonka, Guddida Joogtada ah iyo Gudiyadda Golaha Wakiilada
3. Xogogaal u noqoshada Xalada Dalka
4. Mashaariicda Sharci ee Golaha Horyaal.

No.	Magaca Xeerka	Marxalada aa u marayo	Cida Gacanta ku haysa
1.	Miisaaniyada Qaraka 2015		Gole Waynaha
2.	Xeerka Nidaamka Xukuumadda		Gudidda Joogtada
3.	Xeerka ilaalinta Duurjoogta iyo keymaha	Akhriska 1aad	Gudidda Degaanka
4.	Xeerka Duulista Hawada	Akhriska 1 ^{aad}	Gudidda Arrimaha Bulshada
5.	Xeer Hoosaadka Golaha Wakiilada		Gudidda Joogtada
6.	Xeerka Waxbarashada Qaranka JSL	Warbixinta W.Waxbarashada	Gudidda Arrimaha bulshada
7.	Xeerka Saxaafada	Akhriska 1aad	Gudidda Arrimaha

			Bulshada
8.	Xeerka La dagaalanka Argaxisada	Warbixinta W.Arrimaha Gudhaa	Gudidda Arrimaha Gudaha
9.	Xeerka Caasimada		Gole Waynaha

5. Uyeedhista Masuuliyiinta Qaranka
6. Ansixinta Masuuliyiinta Qaranka
7. Xeerarka Golaha Guurtidaka soo noqda
8. Xeerarka Madaxweynaha ka soo noqda ee aanu saxeexin.
9. Iyo Wixii kale ee soo kordha

2. Kal-fadhigii 26^{aad}

No	Kal-fadhiga	Taariikhda uu furmay	Taariikhda uu xidhmay
1.	26 ^{aad}	24/11/2014	13/01/2015

Kal-fadhigan oo Goluhu qabtey hawlo aad muhiimaa ay ka mid ahaayeen Ansixinta Xeerarka ay ka mid ahaayeen Xeerka Xabsiyada, Xeerka Dib u-habaynta Shuruucda, Xeerka keymaha iyo Duur-joogta iyo Ansixinta Oodoroska Miisaaniyada 2015ka iyo Xisaab Xidho, halkan ayaanu ku soo bandhigeynaa Wax qabadkii Kal-fadhiga 26^{aad} oo dhameysitiran si aynu u dardargalino kal-fadhiga 27^{aad}.

3. Xeerarka Goluhu ka doodey:-

No	Magaca Xeerka	Watkhtiga laga doodey
1.	Xeerka Keymaha iyo Duur-joogta	7-8/12/2014

3. Mashaariicda Sharci iyo Xisaab Xidhada Goluhu Ansixiyey

No	Xeerka	Taariikhda	Loo gudbay
1.	Xeerka Keymaha iyo Duur-joogta	05/01/2015	Guurtida
2.	Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka	06/12/2014	Madaxweynaha

[Waaxda Hadal Qoraalka](#) | [Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 26^{aad}](#)

	Diiwaangalinta Codbixiyayaasha		
3.	Xeerka Xabsiyada	27/12/2014	Madaxweynaha
4.	Xeerka Aassaaska Komishanka dib u-habyenta Shuruucda	28/12/2014	Madaxweynaha
5.	Xeerka Assaaska Komishanka HIV/AIDska	28/12/2014	Madaxweynaha
6.	Xisaab Xidhada 2008-2013kii	10/01/2015	Maadaxweynaha

4. Ansixinta Odoroska Miisaaniyada 2015ka:-

Wasaarada Maaliyadu waxay Odoroska Miisaaniyada 2015ka u soo gudbisey Golaha Wakiilada 11/09/2014, iyadoo Wasaarada Maaliyadu saddexdii sano ee ugu dambaysay Golaha ku horkeentay Miisaaniyada intaan la gaadhin Bisha December.

Hadaba, Wasiirka Maaliyada oo ay Waheliyaan Masuuliyiinta ugu sareysa Wasaaradaasi sida Wasiiru-dawlaha Wasaarada Maaliyada iyo Agaasimaha Guud waxayna Warbixin Golaha ka siiyeen Miisaaniyada 2015ka 30/11/2014, iyadoo Miisaaniyadaasi ay aheyd lacag dhan **1,080,000,000,000/= S1 Sh**, oo u dhiganta dollar ahaan **\$ 180,000,000 (boqol iyo sideetan Milyan oo dollar)** waxayna ka badneyd Miisaaniyadii sanadkii ka horeeyay 2014ka oo aheyd **\$152,000,000 (boqol iyo konton iyo laba Milyan oo dollar)**, waxayna ka dheer tahey **\$28,000,000 (sideed iyo labatan milyan oo dollar)**. Sida shaxdan hoose ka muuqata Miisaaniyada 2015ku waxay ka kooban tahay:-

NO	Hay'adda	SLSH	Dollar
1.	Dawladda Dhexe	1,080,000,000,000	\$180,000,000
2.	Hayadaha Madaxa Banaan	176,846,392,352	\$29,474,399
3.	Dawladdaha Hoose	164,877,744,867	\$27,479,624
4.	Dakhliga Deeqaha caalamiga ah(Denmark& Britain)	85,800,000,000	\$14,300,000
	Isugeyn	1,507,524,137,219	\$251,254,023



Warbixinta Wasiirka ka dib, waxay Gudidda Dhaqaalaha oo sida Sharciga ah loo gudbiyo Miisaaniyada marka Wasiirku Warbixinteeda jeediyo ay Golaha us soo gudbiyeen Warbixintoodi intaa Mudanayaasha Golaha Wakiiladu ay Fadhigii 13^{aad} ee kal-fadhiga 26^{aad} ee taariikhdu ahay 14/12/2014 Su'aalo ka Waydiiyeen Wasiirka Wasaarada Maaliyada Odooroska Miisaaniyada 2015ka, isla fadhigii xigey oo ahaa 15/12/2014kii wuxuu Goluhu uu Duuduub ku ansixiyay Odooroska Miisaaniyada 2015ka iyagoo aan ka doodinsidii caadadu ahaan jirtey, waxaana Cod Aqlabiyad ah oo 39 Mudane ah ku ansixiyeen Miisaaniyada iyadoo aaney cid diidey jirin, saddex Xildhibaana ka aamuseen, sidaasna Goluhu ku ansixiyay Miisaaniyada sanadkan ee 2015ka Odooroskeeda oo ah lacag dhan (1,080,000,000/= S1 Sh)

5. Masuuliyiinta Goluhu Ansixiyay



Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 26^{aad}

No.	<u>Magaca Masuulka</u>	<u>Xilka</u>	<u>Taarikhda</u>
1.	Md. Siciid Cali Muuse	Xubin Komishanka Doorashooyinka	29/11/2014
2.	Md. Maxamed Jaamac	Xubin Komishanka Doorashooyinka	29/11/2014
3.	Md. Maxamuud Jaamac Waceys	Xubin Komishanka Doorashooyinka	29/11/2014
4.	Marwo. Kaltuun Sh. Xasan Cabdi	Xubin Komishanka Doorashooyinka	29/11/2014
5.	Md. C/qaadir Iiman Warsame	Xubin Komishanka Doorashooyinka	29/11/2014
6.	Md. C/fatax Ibrahim Xasan	Xubin Komishanka Doorashooyinka	29/11/2014
7.	Md. C/raxman Cisman Adam	Xubin Komishanka Doorashooyinka	29/11/2014

6. Masuuliyiinta Qaran ee Golaha Warbixino siiyey.



No	Masuulka	Warbixinta
1.	Md. Cabdicasiis Maxamed Samaale Wasiirka Wasaarada Maaliyada	Warbixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2015ka
2.	Md. Maxamuud Aw Cabdi Ibrahim Hanti-dhowraha Guud ee Qaranka	Warbixinta Xisaab Xidhada Miisaaniyadaha 2012kii iyo 2013kii

2. Xeerarka Golaha iyo Gudiyadu Gacanta ku hayaan:-

No.	Magaca Xeerka Golaha wali horyaal	Cida Gacanta ku heysa
1.	Xeerka Duulista Madaniga ah	Goleweynaha
2.	Wax ka badalka Xeerka Booliiska	Goleweynaha
3.	Xeerka Hay'adda Dhowrida Tayada	Guurtida ka soo noqdey
4.	Xeerka Ilaalinta Keymaha iyo Duurjoogta	Guurtida ka soo noqdey
5.	Wax ka badalka Xeerka Xabsiyada	M/weynahu soo celiyay
6.	Wax ka badalka Xeerka Assaaska Komishanka Dib u-habeynta Shuruucda	M/weynahu soo celiyay
7.	Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baananka	Goleweynaha (Ad hoc Committee)
8.	Xeerka Midaynta Cashuuraha	Gudidda Dhaqaalaha
9.	Xeerka Caymiska Qaranka	Gudidda Dhaqaalaha
10.	Xeerka Law of Establishment of Somaliland Agency	Gudidda Dhaqaalaha
11.	Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Cigaabta guud	Gudidda Garsoorka iyo Cadaalada
12.	Xeerka Kufsiga iyo dambiyada Galmada (rape bill)	Gudidda Garsoorka iyo Cadaalada
13.	Xeerka Shaqaalaha Dawladaha Hoose	Gudidda Arrimaha Bulshada
14.	Xeerka Saxaafada	Gudidda Arrimaha Bulshada
15.	Xeerka Ciyaaraha	Gudidda Arrimaha Bulshada
16.	Xeerka Waxbarashada	Gudidda Arrimaha Bulshada
17.	Xeerka Macdanta (Miniral Act)s	Gudidda Deegaanka iyo kheyraadka Dabiiciga ah
18.	Xeerka shidaalka (patrolium Act)	Gudidda Deegaanka iyo kheyraadka Dabiiciga ah
19.	Xeerka ka hortaga Argagixisada	Gudidda Arrimaha Gudaha
20.	Xeerka Nidaamka Xukuumada.	Gudidda Joogta iyo Anshaxa
21.	Wax ka badalka iyo kaabista Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada	Gudidda Joogta iyo Anshaxa

8. Waxqabadka Guddi Hoosaadyada Golaha Wakiilada.

Gudidda Joogtada iyo Anshaxa

Kulan Cilmiyeedkii Xeerka Nidaamka Xukuumada:- 23/12/2014 waxay Gudidda Joogtadu Kulan Cilmiyeed u qabatey Xeerka Nidaamka Xuukamada oo ay Gudiddu Gacanta ku heyso kulan Cilmiyeedkaas oo ay ka soo qeyb-galeen daneeyayaaha Xeerka Nidaamka Xukuumada Workshopkaas oo socdey mudo saddex cisho ah waxaana Workshopka Gudidda ka caawiyay Hay'adda UNDP.

Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka

Warbixintii Guddida ee kormeererii Gobolada Dalka:- Gudidda Ilaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka (Public Accountant Committee) ee Golaha Waxay 01-07/11/2014kii Kormeer Ujeedadiisu aheyd u guurgalida Xaalada iyo Baahiyada Gobolada Dalka ka jira iyo Waxyaabaha ka gaadha Miisaaniyada Guud ee Qaranka Goboladaas iyo soo indho-indhayn ay ku soo sameynayeen Ilaaha Dhaqaalaha Dalka sida Kastamada, Dekada Berbera iyo Keydka Haamaha Shidaalka.

Waxayna Gudiddu 20/12/2014 Warbixin Dheer oo Waxyaabo badan taabanaysa Golaha ka siisey kormeerkaas, iyadoo Waxyaabaha ugu waaweyn ee taabanaysay ay ka mid ahaayeen Saamiga Goboladaas ka gaadha Miisaaniyada Guud ee Qaranka iyo sida Wasaarada Walba Miisaaniyadeed Gobolada u gaadhsiiso iyo Guud ahaan Baahiyaha Gobolada ka jira.

Warbixintii Guddida ee Xisaab Xidhada 2008-2013ka:- 20/12/2014

Waxay Gudidda Ilaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka Golaha ka jeedisey Warbixin ay ka soo diyaariyeen Xisaab Xidhada 2012 iyo 2013ka iyo kulamo ay kala yeeshen Hanti-dhowraha Guud, waxayna Gudiddu Warbixinteed ku sheegtey ina aanu Hanti-dhowraha Guud wada-shaqeyntii ka dhaxeysay aanu tixgalin, isla markaana uu Gudiddu u soo gudbin waayay Cadeymihii iyo dokumantiyadii ay u baahnaayeen inuu soo raaciyo Xisaab xidhada isagoo ka

caga jiiday, sidoo kale waxay warbixinta ku sheegeen in Xisaab Xidhada uu Golaha u soo gudbiyay Hanti-dhowruhu aaney dhameys tirneyn oo wax badan ka khaldan yihiin.

Waxayna Warbixintooda Gudiddu ku sheegtey in ka dib markii ay in badan eegeen xogona ka urursadeen Hay'adda Hanti-dhowrka Guud ay u soo baxdey;-

- In aan wax wada shaqeyn ahi ka dhaxeeyn Madaxda u sareysa Hay'addaas, Gudoomiyuhuna lumiyay nidaamkii wada-shaqeyneed.
- In shaqada Hay'addu ku kooban tahey Gudoomiyaha oo uu waheliyo Agaasimaha Guud.
- In hay'addu noqotey hay'adda ugu hooseysa tayo ahaan intii ay la kulmeen Madaxda Qaranka.
- Inaanu Gudoomiyuhu aanu ogoleyn inuu xogo qoraala u soo gudbiyo Golaha oo ku saabsan musuqmaasuqa hadheeyay dawlada ee uu afka ka sheegayo.
- Ina aaney hay'adda laftigeedu ka madhneyn maamul xumo baahsan oo dhexdeeda ah taas oo sababi karta wax isdaba marin.

Ugu dambeyntii Waxay Gudiddu Warbixinteed Golaha ugu soo jeedisey dhowr arrimood oo ka ay ka mid ahaayeen, in Madaxweynuhu dib u eegis ku sameeyo hay'adda hanti-dhowrka guud, in la celiyo Xisaab-xidhada 2008 ilaa 2013kii iyo in Wax ka badal iyo kaabis lagu sameeyo Xeerka Hanti-dhowrka Guud ee Xeer Lr. 05/98 oo ku dhisan Cahdi-qarameedkii lana waafajiyo Dastuurka Qaranka JSL.

Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada

Warbixintii Miisaaniyada:-Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyadu waxaa Goluhu sida sharcigu yahay 30/11/2014 ku wareejiyay Odooroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2015ka ka dib markii Wasiirka Maaliyadu Warbixinta Miisaaniyada Golaha ka hor akhriyay, Waxayna Gudiddu Dhaqaaluhu

Warbixinteeda Odoroska Miisaaniyada Qaranka 2015ka Golaha ku soo celisay 13/12/2014.

Kormeer Egal Internaional Airport:- Guddida dhaqaalaha Waxay kormeer shaqo ku booqatey Madaarka Cigaal ee Caasimada Hargeysa, Xubnaha Gudidda ayaa waxa halkaasi ay kulan albaabadu u xidhnaayeen kula yeeshen masuuliyiinta sarsare ee Wasaaradda Duulista oo uu hogaaminayey Wasiirka Wasaaradaasi Md. Maxamuud Xaashi Cabdi, isla markaasina ay wehelinayeen Agaasimaha Guud Cumar Sayid Cabdilaahi Aadan, Maamulaha Madaarka Cigaal Maxamed Yuusuf Ismacil, iyo masuuliyiin kale.

Xubnaha Guddida dhaqaalaha ee Golaha Wakiilada ayaa kulankaasi ka dib indho indhayn ku sameeyey qaybo ka tirsan madaarka Cigaal, iyadoo halkaasi war bixino lagu siiyey, intaasi ka dibna masuuliyiinta Wasaaradda duulista iyo xubnaha Gudidda ayaa wada qabtay shir Jaraa'id oo ay Saxaafadda kula hadleen.

Guddida Kheyraadka dabiicga ah iyo Deegaanka

Soo Gudbintii Xeerka Ilaalinta keymaha iyo duur-joogta:- 02/12/2014 ayaa Gudidda Kheyraadka Dabiiciga iyo Deegaanka Golaha u soo Gudbisey Xeerka Illaalinta Keymaha iyo Duur-joogta ah oo Guddidaasi Gacanta ku heysay iyadoo Gudidda warbixinta Golaha uu uga jeediyay Gudomiyaha Gudidda **Md. Siciid Warsame Ismaaciil** loona qeybiyay Mudanayaasha Fadhiga soo xaadirey nuqulka Lifaafa gudidda ee Xeerka Duulista Madaniga ah.

Kormeererii Gudidda ee Gobolka Saaxil:- 02/02/2015 waxay Guddida Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah kormeer ku tageen Gobolka Saaxil magaalada madaxdiisa Berbera, ujeeda kormeerkaas oo aheyd wax ka ogaanshaha xaalada Deegaanka Gobolka saaxil gaar ahaan Magaalada Berbera, waxa kale oo Gudiddu Xog u raadineysay Xeer ay Gacanta ku hayso sameyntiisa oo ka mid ahaa dhowr xeer oo Gudiddu Curisey Xeerkaas oo ahaa Xeerka Ilaalinta Qashinka (Waste Management Act) kormeerkaas oo qatey 3 maalmood waxay gudiddu booqatey Xafiiska Badhasaabka, Xafiiska Mayorka oo ay kula kulmeen Xildhibaanada Golaha Deegaanka kuwaas oo warbixin ka siiyay Xaalada Guud ee Daagaanka Magaalada Berbera iyo sidey qashinka u maamulaan.

Guddida Arrimaha Gudaha

Ka Talo-bixintii Xubnaha Komishanka Doorashooyinka:- Waxay Guddida Arrimaha Gudaha ee Golaha Wakiilada JSL 29/11/2014 Golaha u soo Gudbisey talo-bixintooda Xubnaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka oo ka koobnaa 7 Xubnood, ka dib markii Kulamo ay la yeesheen Xubnaha Gudidda sida sharcigu u siiyayna ay soo hubisey inay xubin kasta buuxisey Shuruudihii looga baahan ay Golaha u soo jeediyeen in Xubnahaa loo asnixiyo Xilka komishanka Doorashooyinka Qaranka, iyadoo Goluhu Xubnahaa ansixiyay is la maalintaas oo taariikhdu aheyd 29/11/2014.

Guddida Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.

Kulan Cilmiyeedkii Xeerka Kufsiga iyo Tacadiyada:- 14-15/01/2015ka Waxaa Gudidda Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka iyo Dalada Haweenka ee NEGAAD wada-jir u qabteen Kulan Cilmiyeed (Workshop) lagu gorfeynayay Xeerka Kufsiga iyo Tacadiyada ka dhanka ah Haweenka, Xeerkaas oo soo Wada diyaariyeen Kooxda loo yaqaan Danwadaagta Caafimaadka (Health Caucus) oo ku bahoobeen Koox Xildhibaanoo ka tirsan Golaha Wakiilada iyo ururada Bulshada, waxaa Xeerka ay Kooxdaasi ku wareejiyey Gudidda Garsoorka iyo Cadaalada oo iminka Gacanta ku haysa.

Kulankii Gudidda iyo Gudidda Ruqsad Bixinta Qareenada:-

02/12/2014Gudidda Garsoorka, Cadaaladda iyo Xuquuqal Insaanka ee Golaha Wakiiladda JSL waxay kulan Xog-waraysi Guddidu la yeelatay Ruqsad-bixinta Iyo Anshaxmarinta Qareenada, waxayna kawadahadleen waxyaabo Gudiddaas ka cabaneysayoo ay ka mid yihiin, Xeerka Qareenada oo siiyay qodobadan in aan Miisaaniyada wax ku yeeshaan iyo anay miisaaniyada u madax banaanaadaan iyo Inay meel gaara oo ay ku shaqayaan helaan oo aanaan wasaarada Cadaaladda ka hoos shaqayn, In aan shaqaale inta ay iyagu baahdaan qortaan ama qaataan.

Kulankii Gudidda iyo Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka:- 03/12/2014

Gudidda Garsoorka, Cadaaladda la yeelatay Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxaanu kulan kan u jeedadiisu ahayd in Xeerasha curinta u baahan iyo kuwa amendment-ka u baahan wax laga qabto, oo Goluhu Xeerarkaa oo baahi weyn dalku u qabo, Waxaana ka mid ahaa xeerashaa.

- Xeerka Maxkamada Sare

- Dibu eegista Xeerka Nidaamka Garsoorka
- Xeerka Maxkamada Ciidamada
- Xeerka Xeer-ilaalinta Ciidanka
- Xeerka Gudidda Cadaaladda
- Dibu eegista Xeerka Xeer-ilaalinta Guud

Kormeerkii Gobolka Saaxil:- 02/02/2015 Waxay Guddida Garsoorka iyo Cadaaladu Kormeer ku tageen Gobolka Saaxil, kormeerkaas oo u jeedadiisu ahayd u kuurgalida Xaalada Jeelasha, Saldhigyada iyo Guud ahaan Hanaanka Cadaaladeed iyo Adeega Garsoorka ee Maxkamadaha Gobolkaas oo qatey mudo saddex cisho ah, iyadoo Gudiddu Kormeerkooda ka bilaabmey Magaalada Mandheera oo uu ku yaalo Jeelka ugu weyn Somaliland isla markaana ah Xarunta Tababarada Ciidamada Somaliland, waxay uga sii Gudbeen magaalada Berbera ee Xarunta Gobolka iyadoo magaaladaasna Kormeer ku soo marey Jeelasha, sidoo kalena kulamo la yeelatey Masuuliyiinta ugu sareysa Maxkamadaha iyo Jeelasha Gobolkaas.

Guddida Arrimaha Bulshada iyo Diinta

Soo Gudbintii Xeerka Duulista Madaniga ah:-11/01/2015 aya Guddida Arrimaha Bulshado Golaha u soo Gudbisey Xeerka Duulista Madaniga ah oo Guddidaasi Gacanta ku heysayiyadoo Guddida warbixinta Golaha uu uga jeediyay Gudomiyaha Guddida **Md. Xasan Cawaale Ceynaan,** loona qeybiyay Mudanayaasha Fadhiga soo xaadirey nuqulka Lifaaqa guddida ee Xeerka Duulista Madaniga ah.

Guddida Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah

Kulankii Guddida iyo Wasiirka Arrimaha Dibada:------Mudanayaashaasha Guddiga Arrimaha Dibada iyo iskaashiga caalimagu Waxay xiiskeeda Golaha kula kulantey Wasiirka Arrimaha Dibada Somaliland **Mudane Maxamed Biixi Yonis,** kulankaas oo Gudoominayay Guddida Md. Axmed Cabdi Nuur (kijandhe), waxaanu wasiirka ugu waramay ujeeda kulanka ay Guddida Goluhu ugu yeedhay oo ahaa Xogwaran, intaa ka dib waxaa xogwaran ku saabsan siyaasada arrimaha dibada ee somaliland iyo hawlaha shaqo ee ay waasaaradiisa qaranka ugu wakiiltahay Wasriirka Arrimaha Dibada.

9. Aqoon korodhsiyo, Workshops iyo Kormeero:-

23-25 December 2014 Gudidda joogtada iyo Anshaxa Golaha Wakiiladda oo taageero ka helaya Hay'adda horumarinta mashaariicda ee qaranamada midoobay (UNDP) gaar ahaan mashruuca taargeerida baarlamaanka ayaa waxaa ay soo qaban-qaabiyeen sadex cisho oo shir wadatashi ah oo ku saabsan qabyo qoraalka xeerka nidaamka xukuumada, kulan cilmiyeedkaasoo lagu qabtey furmay Hotel Ambassador 23-25 December 2014.

Waxaa ka soo qeyb-galey Wasaaradaha Dawlada, Hay'addaha Dawlada, garyaqaanada iyo aqoonyahanada, iyo sidoo kale bulshada rayidka ah, muddadaa sadexda cisho ah ee kulanku socday waxaa laga doodaylana falan-qayneeyay Qabyo Qoraalka Xeerka Nidaamka Xukuumada kaasi oo ay mas'uulkayihiin gacanta ku hayaan Guddida Joogtada iyo Anshaxa ee Golaha Gakiilada ka hor intaan loo gudbin goleweynaha.



Mudadii Saddexda Cisho ahay ee uu socdey Kulan cilmiyeedkani waxaa ka soo qeyb-galayaashu Xeerka kaga shaqeeyeen waxyaabaha uu u baahan yahay in lagu daro, waxyaabaha aan loo baahneyn ee ku jira, sidoo kale waxay guruubyada ka soo qeyb-galayaashu soo jeediyeen qodobkasta sida uu ku habon yahay, waxaana xidhitaankii Gudiddu u mahad-naqdey ka soo qeyb-galayaasha iyagoo balan qaadey inay waxyaabaha muhiimka ah ee ay soo jeediyeen tixgalin muhiima siin doonaan.

Aqoon korodhsi loo qabtey Mudanayaasha:- intii lagu jirey fasax waxaa Mudanayaal ka tirsan Aqalka Golaha Wakiilada loogu qabtey Hallka Golaha Tababar aqoon korodhsi ah oo Tababarkan oo ay fulinaysay Hay'adda UNDP waxaa tababarka bixinayay khabiir ka lataliye kula shaqeeya Hay'adda UNDP oo Magaciisu yahey **Dr. ATM Obaidullah** waxaana ku saabsanaa saddex mawduuc oo kala ahaa:-

- Parliamentary Budget instruments and fiscal Policy
- Parliamentary Stages of Budget
- Parliamentary Concept, Process and practice



Tababarkan oo socdey mudo laba cisho ah, iyadoo ay ka soo qeybgaleen Mudanayaal farabadan oo ka faa'ideystey mawduucyada tababarku ku saabsanaa.

Tababar Shaqaalaha ah:-Shaqaalaha Golaha Wakiilada JSL ayaa waxaa Tababar loogu qabtey Xarunta Golaha Wakiilada, tababarkaas oo socdey saddex maalmood waxaa ka soo qeyb-galey Dhamaan Shaqaalaha Golaha Wakiilada ka hawlgal, waxaa tababarkaasi waxaa lagu baranayay Monitoring and Evaluation, waxaana soo qaban qaabisay Hay'adda UNDP waxaana tabinayay oo bixinayay Mr. Jibriil oo ah ninka haysta qaybta Monitoring and Evaluation-ka UNDP qaybta la shaqaysa Baarlaamka.



Furitaankii tababarkaa oo uu Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiiladu furey wuxuu shaqaalaha Golaha kula dardaarmey inay ka faa'ideystaan aqoonta casharada tababarka lagu bixinayo oo shaqadadooda wax badan ka tari doonta ayna ku dabiqidoonaan.

10. Wufuudii Golaha Timi:-

12 March 2015 ayaa Gudoomiyaha Golaha wakiiladda **Mudane Cabdiraxman Maxamed Cabdilaahi** oo uu wehiliyo Gudoomiye ku-xigeenka labaad ee Golaha **Mudane Cali Yusuf Axmed** iyo Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada **Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle** ayaa xafiiska Gudoomiyaha Golaha ku qaabilay wefti ka socda Hay'adda Chemonics, “Chemonics waa company socodsiindoonamashaariicdii ay USAID la qabatosomalilandiyo Somalia”, xubnaha ka socday chemonics ayaa saaka booqasho iyo isbarasho ugu yimid golaha wakiilada, waxaana ay kakoob naayeen sadex masuul, labada dhinac intii shirku u socday waxaa laga wadahadlay baahiyaha aas-aasiga ah ee Baarlamaanka hada haya iyo hiigsiga baarlamaanka oo mudo sadex sano ah oo halsano ka hor la ansixiya,y sidii wax ay uga wada qaban lahaayeen, waxaa ay madaxda chemonics sheegeen in mashruucodu leeyahay sadex ujeedo oo kala ah, in lala shaqeeyo baarlamaanka, fulinta iyo ururada aan dawliga ahayn.



Shirkan wuxuu ku soo gabo-gaboobay is afgarad iyo jawifiican, waxayna chemonics sheegeen in ay xafiiskoodii Hargeisa si dhakhso ah u faranayaan, iyagoo bilaabayana mashaariicdooda sida ugu dhakhsaha badan

13/01/2015 ayaa Guddoomiye ku-xigeenka 2^{aad} **Md. Dr. Cali Yusuf Axmed** iyo Xildhibaan kale oo ka tirsan Golaha Wafti ka socday Dawlada Hoose ee Magaalada shefield ee Dalka Ingiriiska kuwaas oo ka mid ahaa xildhibaan dhawaan Golaha deegaanka ee magaaladaas horeyay mooshin lagu aqoon sanayo Somaliland kaas oo noqday aqoonsigii u horeyay ee Gole deegaanka ee magaalada shefield uu siiyo dalkan Somaliland.



Xildhibaanadan oo ah kuwa si wanaagsan ula shaqeeya shacabka Somaliland ayaa waxaa uu Gudoomiyuhu Md. Dr. Cali Y. Axmed ugu horayn si diiran ugu soo dhaweeyay dalkan Somaliland iyadoo si aad ahna layskaga xog-waraystay qadiyada Somaliland iyo sidii hore loogu sii wadi lahaa.

Bishii January 2015 ayaa Wafti ka socotey Ururka Dublamaasiyiinta Madaxa-banaan waxaa Golaha ku soo dhoweeyay oo kulan Xafiiskiisa kula yeeshay Kusimaha Gudoomiyaha ahna Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha Wakiilada JSL **Dr. Cali Yuusuf Axmed.**

Weftigan Diblumaasiyiinta Madaxa-banaan oo uu hogaaminayay Agaasimaha ururkaas Mr. **PUAL WHITEWAY** oo uu wehelinayay **Michle** oo dalkan

Jamhuuriyada SOMALILAND hada loo soo magacaabay xafiisna ku yeelan doona wasaarada Arimaha Debeda.



Gudoomiye **Dr cali Yusuf** ayaa warbixin dheer ka siiyey dalka iyo Taariikhdiisa guud ahaan sidii somaliya iyo somaliland ay u midoobeen waxyaabihii keenay kala Go'a mudadii aynu dawlada ahayn iyo sidii dalkani halkan maanta ku soo gaadhay, waxa uu uga waramay nidaamka dimuqraadiga ah ee dalku qaatay iyo sida ay u dabaqeen guud ahaan shuruudihii dawladnimo ee dal looga baahna welise aanay dunidu indho gaara ugu eegin.



weftiga oo ayaa iyaguna iga mahadnaqay soo dhoweynta diiran iyo sida quruxda badan ee uu warbixinta u siiyey Gudoomiyuhu isla markaana waxa uu balan qaaday inay kala shaqayn doonaan somaliland sidii ay hadafkeeda iyo hankeeda Dawlad madax banaan u noqon laheyd inay kala shaqaynayaan isla markaana waxa uu iftiimiyeey inay xafiis cusub hada ka furteen Somaliland oo wax badan fududayn doona.

[Waaxda Hadal Qoraalka](#) | [Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 26^{aad}](#)

11. Safarda Dibada:-

Waxaa **11 December 2014**kii Safar ku tagey Gudoomiyaha Golaha **Md. C/raxman Maxamed Cabdilaahi (Cirro)** iyo Gudoomiye ku-xigeenka 1^{aad} ee Golaha **Md. Baashe Maxamed Faarax** Dalka aynu jaarka nahey ee itoobiya, gaar ahaan kilidhka bishigo ee Koonturta dalkaas oo lagu qabanayay Xuska Maalinta Qoomiyadaha Itoobiya oo sanadkasta bisha December la qabto laguna casuumo Shir-gudoonka Golaha Wakiilada.

Hadaba, waxaa Gudoomiyayaasha Golaha ku soo dhoweeyay Kilidhka Bishigo Madaxweynaha Kilidhkaas Axmed Nasiir, Xildhibaan Heer Dalkaas ah oo heer qaran ah iyo Madaxda kale ee Kilidhkaas.

Gudoomiye Cirro iyo Gudoomiye ku-xigeen Baashe intii aaney u duulin Kilidhka Bishigo waxay Caasimada itoobiya ee Adisababa kula kulmeen Safiirka Dalka Ingiriiska u fadhiya eithiopia, waxayna Safiirka kulankaas kaga wada-hadleen arrimo badan oo ka mid tahay Xaalada Amni ee Mandaqada Geeska Afrika gaar ahaan Argagixisada iyo Budhcad Badeeda, sidoo kale waxay isla soo qaadeen Xaalada Guud ee Somaliland gaar ahaan arrimaha Doorashooyinka.




Safiirka Dalka Ingriiska u fadhiya Dalkaas itoobiya, wuxuu isna dhiniciisa kulankaa ka sheegay sida uu dalkiisu u jecelyahay inay Somaliland sii wada horumarka dhinaca Dimuqraadiyada, gaar ahaan sidii dalka ay uga dhici laheyd doorasho xor iyo xalaal ah oo ka turjuma rabitaanka shacbiga reer Somaliland.

December 2014 waxaa Gudoomiye Ku-xigeenka 1^{aad} Md. Baashe Maxamed Faarax iyo Gudoomiyaha Gudidda Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah Md. Axmed Cabdi Nuur (Kijaandhe) ka mid ahaayeen Wafti balaadhan oo Somaliland oo uu Hogaaminayay Madaxweynaha Somaliland Md. Axmed maxamed Maxamuud (Siilaanyo), Waftigaas oo dalkaa kaga qeybgaley

[Waaxda Hadal Qoraalka](#) | [Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 26^{aad}](#)

Wadahadalka Somaliland iyo Somaliya oo uu marti qaadey Madaxweynaha Dalka Djabuti Md. Ismaciil Cumar Geele.



Wadahadalkaas oo ka dhacey Caasimada Wadankaas ee Djabuti ayaa waxaa December 21, 2014 laga soo saaray qodobbo ay isla garteen labada Madaxweyne Siilaanyo iyo dhigiisa Somaliya Xasan Sheekh iyo ergooyinka wehelinayay, kuwaasi oo ah waxyaabo ay labada dhinac iska kaashanayaan.

Qodobada ka soo baxay Wada hadalka oo Maanta furmay waxa ka mid ah:-

1. In la dardar galiyo wada hadalada labada dhinac, islamarkaana wakhti lagu jaangooyo.
2. Labada dhinac waxay ku heshiiyeen in arimaha siyaasadda ee Masiiriga ah Lagu dhiirado, lana fuliyo waxyaabihii hore loogu heshiiyay oo ah in laga dhawrsanaado waxyaabaha wada hadalka carqaladayn kara.
3. Inaan la Siyaasaddayn deeqaha Bani'aadanimu iyo Mashaariicda dib u dhiska walibana la dhiiri galiyo.
4. In la fuliyo Heshiiskii Hawadda (In labada dhinac wada jir u maamulaan hawadda).
5. Labada dhinac waxay ku heshiiyeen in la isla garto inay wada hadalada ka qayb gali karaan Khubaro farsamo iyo Wadamada Saaxiibka ahi marka loo baahdo.
6. In Ergada labada dhinac ee Somaliland iyo Somalia madasha tan xigta ay ku kulmaan dalka Turkiga 15-16-ka January sanadka 2015-ka.

[Waaxda Hadal Qoraalka](#) | [Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 26^{aad}](#)

January 2015 ayaa Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Md. C/raxman Maxamed Cabdilaahi (Cirro)** Wuxuu kula Kulamay Dalka Imaaraadka Carabta Gudoomiyaha Baarlamaanka Jaamacada Carabta **Mr. Axmed Al-Jarwan** kulankaas oo ka dhacey Abu-dabi ee Imaaraadka Carabta, waxaa Gudoomiyaha oo Safar ku jooga dalkaas oo kulanka Gudoomiyaha Jaamacada Carabta uga Waramay Taariikhda Somaliland ilaa 1960kii iyo heerarkii ay soo martey ee dib u dhiska, sidoo kale waxay iska wareysteen Xidhiidhka ka dhexeeya Somaliland iyo Dalalka Carabta, wuxuuna Gudoomiyuhu u sheegay inay Somaliland tahey dal madax banaan oo xoriyadiisii dib ugala soo noqdey wixii la isku odhan jirey Somalia, kana hirgaleen hanaanka dimuqraadiyadeed oo ka jiraan xisbiyo badan.

Gudoomiyaha Baarlamaanka Jaamacada Carabta oo xafiisku yahay Magaalada Abu-dabi wuxuu u sheegay inuu si aad ugu faraxsanyahey kulankan uu la yeeshay Gudoomiyaha Baarlamaanka Somaliland, wuxuuna tilmaamey inuu warbixintaasna u sii gudbin doono dalal carabta, isagoo sido kale tibaaxay inay sii wadi doonaan ka baarlamaan ahaan kulamada noocan ah oo kale.

12. Qiimeyntii Hay'adda ABRIMO ee Maamulka Golaha Wakiilada:-

Waxaa Qiimeyn ku saabsan habsami u socodka Shaqo ee Golaha Wakiilada ah Golaha ku sameeyay Hay'adda ABRIMO oo ah Company qiimeeya tayada shaqo wanaaga Hay'addaha Dawlada iyo private-kaba, qiimeyntaas oo haya'ddasi ku sameysay sidoo kale hay'adda badan oo dawlada ah Goluhuna ka mid ahaa.

Hadaba Waxaa **28/02/2015** xoghayaha Guud ee Golaha Wakiiladu xafiiskiisa ku qabilay madax ka socotay Hay'adda ABRIMO, iyadoo Qiimayn ku sameynaysay dhanka maamulka shaqo ee Golaha Wakiiladda qiimayntan oo la xidhiidha habsami u socodka iyo heerka maamul ee xafiiska iyo sida ay heer caalami u yihiin, saraakiisha abrimo oo uu horkacayo Agaasimahooda Guud Mudane Abdirisak Maxamed Waxay la wadaageen xoghayaha guud natiijadii ka soo baxday qiimayntii ay ku sameeyeen Golaha, kaasi oo Goluhu gaadhey meel aad

u saraysa qiimeynta oo ah(moderate)oo la odhankaro waa darajada ugu saraysa ee uu gaadho xafiis dawladeed.



Madaxda ABRIMO ayaa hambalyo iyo natiijo fiican la wadagay Xogahayaha Guud ee Golaha Mudane Abdirisak Saed Ayanle, Muddadii ay ABRIMO ku gudajireen qiimanayta Golaha waxaa ay su'aalo kabadan 100 su'aalood waydiiyeen madaxda sare ee maamulka Golaha, sida xafiiska xogahayaha guud, xafiiska xisaabiyaha iyo maamulka Golaha iyo xafiiska qorshaynta ee Golaha, ka dib markii ay su'aalaha dhamaysteen waxay markii dambe war-qad war-qad iyo file-file u eegeen dhamaan documentigii Goluhu ku jawaabay si ay indhahooda uga qaataan una xaqiijiyaan.

Ugu damabaytii waxaa suura gashay in ay la wadaagaan Golaha Wakiilada JSL, natiijadii ay kala kulmeen kaasi oo noqoday mid heer sare ah oo aad u fiican, iyadoo afarta heer-qiimeyneed ee wax lagu qiimeynayay kala ahaayeen, 1-Low Risk, 2- Moderate, frequency iyo High Risk, wuxuu Goluhu helay (**Moderate**), oo ah halka ugu sareysa ee Gaadhaan Hay'addaha Dawliga ah ee Africa intooda badan iyadoo aaney jirin hay'adda noqota Low Risk oo ah halka ugu sareya ee qiimeynta.

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xogahayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.

[Waaxda Hadal Qoraalka](#) | [Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 26^{aad}](#)